Agoosto 26 deeda, 2020

Waalidiinta/Masuuliyiinta iyo Qoysaska Qaaliga ahaaw,

Agoosto 21 deeda, warqad ayaa loo diray dhammaan waalidiinta/masuuliyiinta TDSB kuna saabsanayd dib ugu noqoshada dugsiga bisha Sebteembar, waxaan kuu qoraynaa warqadaan maanta adiga iyo waalidiinta/masuuliyiinta haysta caruurta leh baahiyaha waxbarashada gaarka ah. Waan ognahay waxaad ka diiqadeesan tahay inaad wax badan ka oggaato waxa dhici kara marka la furo dugsiyada TDSB aan ardayda kusoo dhaweynayno asbuucyo yaryar gudahood, marka waxaan dooneynaa inaan ku siino macluumaadka cusub oo faahfaahsan.

Kahor inta aanan bilaabin, waxaan dooneynaa inaan kaaga mahad celino dulqaadkaaga joogtada ah maadaama aan ka shaqeynayno dhammaan qorshooyinka muhiimka ah si ay dugsiga dib ugu noqdaan ardayda iyo shaqaalaha. Ma ahayn hawl iyo shaqo toos ah oo fudud waxaan si dhab ah kaaga mahad celinaynaa fahankaaga joogtada ah iyo aaminaada inta aan horey usiisocono. Fadlan ogsoonoow inaan sameynayno wax kasta oo ku saabsan sidii sida ugu dhaqsiyaha badan dugsiga dib loogu noqon lahaa si dhammaan ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska u dareemaan badqab iyo caafimaad.

TDSB waxay u taagan inay hubiso helitaanka waxbarasho loo siman yahay, khayraad iyo fursadaha loogu talagalay ardayda naafada ah, tani waxay sii jiri doonaa inta lagu guddo jiro COVID-19. Fadlan fiiri macluumaadka dheeraadka ah ee hoose looguna talagalay ardayda qaba baahiyaha waxbarashada gaarka ah.

Billowga Daahay: Tallaadada, Sebteembar 15 keeda

Marka la eego waqtiga loo bahan yahay si loo diyaariyo sidii dugsiga dib loogu noqon lahaa asagoo ammaan ah, TDSB waxay tagtay dugsiga isla maalinta koowaad (dugsiyada hoose, kuwa sare iyo dugsiyada habka muuqaalka lagu dhigto) ilaa **Tallaadada , Sebteembar 15 keeda.**

In kastoo gelitaanka dhammaan fasalada la xanibi doono muddo saddex bari ah, ***dhammaan ardayda leh baahiyaha waxbarashada waxay dugsiga bilaabi doonaan Tallaadada, Sebteembar 15 keeda.*** Kuwaani waxaa kujira dhamaan dugsiyada hoose iyo kuwa Sare ee kuyaala meelaha dadka badan, iyo ardayda kujira barnaamijka Caawimaada Kobaca Naafada (ISP) ee lagu dhigo dugsiyada sare. Ardayda qaba baahiyaha waxbarashada gaarka ah ee gaadiidka lagu geedo dugsiga, taariikda ay bilaabi doonaan sidoo kale waa 15 ka Sebteembar.

Tillmaamaha Maaskarada/Gafuur Xirka

In kastoo dhamaan ardayda iyo shaqaalaha laga rabo inay xirtaan maaskarada/gafur xirka marka ay joogaan dhismooyinka TDSB iyo basaska dugsiga, waxaan fahansanahay qaar kamid ah ardaydeena in laga dhaafi karo sababo la xariira caafimaad, xasaasiyad ama sababo kale. Waalidiinta/masuuliyiinta waxaa laga codsanayaa inay si toos ah ogala hadlaan dugsiyada wixii ku saabsan wax kasta oo keenaya in laga reebo maaskarada ama gafuur xirka.

Kooxdeena caafimaadka iyo badqabka shaqada waxay ka shaqeenayaan inay iibsadaan maaskaro loogu talagalay shaqaalaheena iyo ardaydeena u baahan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan maaskaro/gafuur xir waxaa lala wadaagayaa waalidiinta/masuuliyiinta mar dhaw.

Qaababka Waxbarashada

Gugsiga Hosse

Fasalada dugsiyada Hoose ee Waxbarashada Gaarka ah gaar ahaan Barnaamijka Caawimaada Dheeraadka ah (ISP) waxaa loogu talagalay ardayda jira da'aha 6-16 kuna salaysan barnaamijka ISP (marka laga reebo hadiyadaha). Ardayda waxay dugsiga tagayaan 5 bari asbuucii, ayagoo ka kooban hal koox oo isku waqti ah/koox dhigata maalintii oo dhan, ayna kujiraan nasashada iyo qadada.

Tani waxaa kamid ah lix goobood oo loogu talagalay dugsiyada hoose: Dugsiga Beverley, Dugsiga Sare ee Lucy McCormick Senior, Dugsiga Dadwaynaha ee Park Lane, Dugsiga Seneca,Dugsiyada Dadwaynaha ee Sunny View Junior iyo Senior, iyo William J McCordic.

Waxaan ognahay in qaar kamid ah ardayda la kulmi karaan caqabado la xiriira nidaamyada shaqada iyo badqabka caafimaadka ee jira si loo yareeyo gacan ka geesashada kala fogaanshaha jirka. Si loo wax looga qabto walaacyadaas, dugsiyadu waxay la shaqeenayaan qoysaska Waxbarashada Gaarka ah iyo La taliyaasha khaaska ah si loo eego sida ugu habboon loo taageeraayo ardayda iyo shaqaalaha inta lagu jiro waqtigaan.

Dugsiga Sare (Fasalada 9 aad illaa 12 aad)

Fasalada Kobcinta Naafada ee Waxbarashada Dugsiga Gaarka ah (DD) Barnaamijka Caawimaada Degdega ah (ISP) waxaa loogu talagalay ardayda 10 aad. Ardayda waxay awoodaan inay maalin kasta tagaan dugsiga maadaama loo qoondeeyay si koox-koox ah waxayna qaadan karaan dhamaan waxbarashadooda gaarka ah ayagoo wada jira. Ardayda waxay raaci doonaan qaabka simistarka.

Ardayda dugsiyada sare ee ISP oo isku dhafan (oo ay kujiraan ardayda tayada sare leh) kuwaas oo caadiyan isku waqti laga dhigay ardayda waxbarashada gaarka ah iyo kuwa koorsooyinka joogtada ah waxay xaadiri doonaan dugsiyada afarta billood ee koowaad habka dugsiyada sare si loo hubiyo waxbarashada isku dhafka ah ee ardayda facooda.

Ardayda dugsiga sare ee ISP waa ardayda 6-16. Ardayda ma awoodaan inay ka qayb ahaandaan ardayda halka koox ah ee qaadanaaya waxbarashada gaarka ah. Caadiyan, ISP daas waxaa kamid ah MID, LD, ASD, DHH iyo PD waxaana lagu darayaa ardayda facooda ah ee aan kujiran waxbarashada gaarka ah. Ardayda tayada sare leh waxay ka kooban yihiin 30 arday waxaana loo qaybin doonaa labo kooxood oo ah kuwa waxbarashada gaarka ah iyo kuwa aan waxbarashada gaarka ah kujirin. Tani deegaan ahaan ayay isku badeli kartaa ayadoo lagu saleenaayo baahiyaha dugsiga.

Lixda goobood ee dugsiga sare ee la iskugu yimaado kuwaas oo ardaydu maalin kasta raacaan habka simistarka. Goobaha dugsiga sare waa Dugsiga Dhexe ee Etobicoke, Dugsiga sare ee Drewry, Dugsiga sare ee Frank Oke, Dugsiga

sare ee Maplewood, Dugsiyada sare ee Sir William Osler, iyo York Humber.

Dugsiga Oonleenka ah (Xanaanada illaa Fasalka 12 aad)
Waalidiinta/masuuliyiinta doonaya in ilmahoodu wax kubarto guriga waxay dooran karaan dookha waxbarashada oonleenka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo webseetka. Dugsiga hoose iyo kan Sare.

Haddii waalidiinta/masuuliyiinta ay go'aansadaan inay bilaabaan waxbarashada oonleenka ah iyo ayna go'aansadaan inay dugsiga si caadi ah u tagaan, ardayda Ma dhumin doonaan booska ISP. Waxaa jiri doonaa fursado lagu geli karo Dugsiga Oonleenka ah ama dugsiga si tooska ah loo tago dib loogu noqon karo inta lagu jiro sanadkaan. Fiiri taariikhaha kala guurka ee dugsiga hoose iyo kan sare. Haddii badelaad looga baahan yahay meel kabaxsan meelaha loogu talagalay, waxaa la sameyn karaa xadid waxaana dib u eegaya Maamulaha ayagoo lagu saleenaayo kiis ka kiis.

Diiwaangelinta Xaadirista dugsiga ama Waxbarashada Oonleenka ah
Asbuucaan, waalidiinta/masuuliyiinta tagay goobaha dugsiga sare iyo dhammaan ardayda dhigta dugsiga sare ee DD ISP waxaa loo diri doonaa iimayl loogu sheegaayo inay iska diiwaangeliyaan waxbarashada oonleenka ah ama mida sida shaqsiga ah loo tagaayo midkood.

Dhammaan waalidiinta/masuuliyiinta, xataa kuwa kasoo kajawaabay xogta isdiiwaangelinta hore ee bishaan, waxaa laga doonayaa inay xaqiijiyaan diiwaangelinta ilmahooda ayagoo dhameystiraaya is diiwaangelintaan.

Iimaylka waxa uu ka koobnaan doonaa lifaaq gaar ah oo loogu talagalay foomka isdiiwaangelinta oonleenka ah lifaaqana cidna lalama wadaagi karo. Waalidiinta/masuuliyiinta haysta wax kabadan hal cunug waxay heli doonaan hal iimayl oo cunugiiba loogu talagalay waxaana laga doonayaa inay dhamaystiraan foomka kale oo isdiiwaangelinta ilmaga loogu talagalay. Isdiiwaangelinta oonleenka ah waxaa lagu heli karaa 20 luuqadood.

Kaliya waalidiinta/masuuliyiinta aan faylkooda iimayl kuqorin ama kuwa aan dhameystirin isdiiwaangelinta oonleenka ah ayaa heli doona wicitaan isdiiwaangelin waxaana la waydiinayaa inay doorashadooda sheegaan. Wixii macluumaad dheeraad ah ka baro Dookhyada kala duduwan ee isdiiwaangelinta, dhamaan waalidiinta/masuuliyiinta waxaan ku dhiirigelinaynaa inay booqdaan webseetka TDSB.

Arbacasa, Agoosto 26 deeda: Iimayl ayaa loo diray waalidiinta/masuuliyiinta waxaana furma isdiiwaangelinta
Isniinta, Agoosto 31 deeda: Isdiiwaangelinta ayaa ka xirmaysa goobaha la isku dhafay iyo ardayda Dugsiyada Sare ee DD ISPR

Tallaabooyinka Xigga

Waxaan siiwadi doonaa inaan qoysaska la socod siino aana ogeysiino macluumaadka maalmaha soosocda. Waxaan siiwadnaa inaan si dhaw ula shaqeeno Maamulayaasheena, guddi hooska SEAC si dib loogu noqdo dugsiga, iyo dib usoo noqoshada shaqaalaha ee ay dib ugu soonoqonayaan dugsiga waxbarashada gaarka ah iyo guddi hoosaadka isku dhafka ah si loo inaan kudarno dhamaan codadka iyo tixgelinada. Macluumaad badan ka baro Tillmaamaha caafimaadka iyo badqabka ee loogu talagalay dugsiyada.

Waxaan mar labaad kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga joogtada maadaama shaqadaan muhiimka ah ay socoto. Fadlan ogsoonoow in maamulayaashu bilaabayaan macluumaadka gaarka ah ee dugsiga ayna si toos ah ula xiriirayaan qoysaska sida ugu dhaqsiyaha badan. Waan ognahay inaad qabto su'aalo badan iyo walaacyo, shaqaalaha ayaa siiwadaya inay kusiiyaan macluumaadka muhiimka ah ayna wixii jira kula socodsiiyaan.

Waxaan nahay dad wada jira dhammaanteena waxaan wada wadaagnaa hadaf laga wada dhaxeeya si aan u ilaalino badqabka iyo caafimaadka ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska. Waxaan jecelaan lahayn in dugsiyada dib loogu noqdo si habboon sida ugu macquulsan waxaan u baahanahay inaan siiwada shaqeeno si aan oga dhabeeno arintaan.

Kii daacada ahaa,

Carlene Jackson
Agaasimaha Waxbarashada

Alexander Brown
Madax